

## **Waa maxay sababta uu adeegga maadinta carruurta [barnevernstjenesten] idiinla soo xiriirayo?**

### **Waan idin caawinaynaa**

Shaqada ugu muhiimsan ee adeegga maadinta carruurta waa in uu hubiyo in carruurta Norway ku korta ay wanaagsan yihiin oo ammaan qabaan. Taas oo ugu horreyn ba la hubiyo ayada oo qoyska la caawinayo.

Waxaa jira dad ka welwelsan in ay xaaladda ilmihiiinnu wanaagsan tahay, oo sababtaas awgeed ayaan idiinla soo xiriirnay. Taas darteed ayayna farriinta noogu soo gudbiyeen. Hadda waxaan rabnaa in aan idinla kulanno, oo waxaan rabnaa in aan ogaanno sida xaalkiinnu yahay iyo sida aad u aragtaan farriinta welwelka leh ee na soo gaartay. Haddii ay jiraan waxyaalo aad u baahan tihiin in la idinka caawiyo, waxaan haynaa caawimo badan oo kala duwan oo laga yaabo inay qoyska anfacaan.

Waa wax dabiici ah in la welwelo marka uu adeegga maadinta carruurta kula soo xiriiro. Waxaad ogaataa inay iyana caadi tahay in waalidku inta iskood noogu yimaadaan, inay caawin na weydiistaan ama in carruurta iskood noola soo xiriiraan. Sababta loola soo xiriiro adeegga maadinta carruurta waa in ay carruurta iyo qoykoodu caawin helaan. Mararka qaar waxaa dhacda in aan aragno in aysan jirin sabab loo welwelo, oo markaas waxaa dhacda in kiiska la laalo.

### **Muxuu adeegga maadinta carruurta kaa caawin karaa?**

Adeegga maadinta carruurta siyaalo badan ayuu wax u caawin karaa, waxaan jecel nahay in aan qoyska wax la qabanno. Waxaa inta badan dhacda inaan qoyska caawinno muddo gaaban ama dheer, oo aan aalaaba siyaalo kala duwan isku mar u caawinno. Waalidka ayaan talo iyo hagiis siinnaa inta badan, oo si aan idiin caawinno ayaan waxaan la shaqaynaa iskoolka, xannaanadda carruurta, NAV, dhakhtarka joogtada ah iyo qaar kale. Siyaalaha kale oo aan idiin caawin karno waxaa ka mid ah in aan idinka caawinno in aad heshaan boos xannaano carruur, guri ilmuhu uu booqdo ama wax kale oo ilmaha lagu caawinayo.



## Xuquuq sidee ah ayaad leedihiin?

Xuquuq badan ayaad leedihiin markaad la kulmaysaan adeegga maadinta carruurta, warbixin intaan ka badan ayaad na helaysaan markaad nala kulantaan. Xuquuqdaas waxaa ka mid ah:

- Turjubaan ayaad xaq u leedihiin markaad la kulmaysaan adeegga maadinta carruurta. Noo sheega haddii aad turjubaan u baahan tihiin.
- Qof aad ku kalsoon tihiin in uu idinla joogo ayaad xaq u leedihiin markaad la kulmaysaan adeegga maadinta carruurta. Waalidka iyo carruurtuba waa leeyihiin xaqaas.
- Warbixin fiican in kiiska laydinka siiyo ayaad xaq u leedihiin.
- Waxaad xaq u leedihiin in warbixin fiican la idinka siiyo kiiskiinna, waxaad sidoo kale xaq u leedihiin inuu adeegga maadinta carruurta dhegaysto fikradihiinna.



## Waa maxay waajibaadka adeegga maadinta carruurta?

Degmooyinka Norway oo dhan waa in ay lahaadaan adeeg maadin carruur.

- [Xeerka maadinta carruurta](#) ayaa saldhig u ahaanaya shaqada.
- Markay farriin welwel xambaarsan soo gaarto adeegga maadinta carruurta, waxaa waajib nagu ah in aan go'aan ka gaarno in aan kiiska sii baarayno iyo in kale. Haddii aan go'aansanno in aan baarno xaaladda ilmaha, waxaan markaas wareysannaa dad badan oo ilmahaas ku xeeran si aan u ogaanno inay ilmaha iyo qoysku caawin u baahan yihiin.
- Haddii uu qoysku caawin uga baahan yahay hay'adaha kale ee caawimaha fidiya, kuwaas ayuu adeegga maadinta carruurta la shaqaynayaa haddii ay qoyska iyo carruurta ka helayaan caawin ka fiican.
- Adeegga maadinta carruurta waa in uu tixgeliyaa dhaqanka, asalka, diinta iyo luuqadda qoyska.
- Adeegga maadinta carruurta waa in uu hubiyaa in ay ilmaha iyo waalidku helaan warbixin fiican iyo fursad ay fikraddooda ku dhiibtaan.

**Maadinta carruurta waxay caawin kartaa carruuraha iyo qoysaska marka ay ilmaha ama qoysku dhibban yihiin. Haddii aad doonayso warbixin intaan ka badan oo ku saabsan maadinta carruurta, eeg [bufdir.no/barnevern](http://bufdir.no/barnevern).**